WORLD BANK GROUP

Warqadaqooneed Shaqo

Qorshaha Sharci'udejinta Kheyraadka Batroolka: Arrimo la Xiriira Dastuurrada, Sharciyada, Xeerarka iyo Qandaraasyada Batroolka

Qore: John J. Beardsworth, Jr.

"Aqoon Kobcin ku Saabsan Maamulka Khayraadka Shidhaalka"

Tusmo

1 Musduleed iyo Hordhac 1

1.1 Musduleed 1
1.2 Hordhac ..... **Error! Bookmark not defined.**

2 Qaababka Sharci'udejinta Batroolka ee Federaal 3

2.1 Dulmar 3
2.2 Arrimo Dastuur oo Muhiim ah ..... **Error! Bookmark not defined.**
2.3 Tixgelinaha ugu Mudan ee Sharciyada iyo Xeerarka Batroolka ..... **Error! Bookmark not defined.**
2.4 ..... **Error! Bookmark not defined.**

3 Heshiisyada Batroolka iyo Qorshayaasha Miisaaniyadeed ... Error! Bookmark not defined.

3.1 Dulmar 16
3.2 Qodobbada Asaasiga u ah Qorshayaasha Miisaaniyadeed ..... **Error! Bookmark not defined.**
3.3 Noocyada Caanka ah ee Heshiisyada Batroolka ..... **Error! Bookmark not defined.**
3.4 Qorsheyaasha Qaybsiga Waxsoosaarka .. **Error! Bookmark not defined.**

4 Gebagabo iyo Gunaanad ..... Error! Bookmark not defined.

Jaantusyada

Jaatus 2.1: U adeegsiga Sanduuqa Dakhliga Mas'uuliyadaha Hawlgabinta PSC **11**

Jaantus 2.2: Qaabka ay u Dhisanyahiin Warbixinnada EITI **13**

Jaantus 2.3: Dalalka EITI **14**

Jaantus 4.1: Qaabka Dakhligu uga soo Xeroodo Habka PSC - Dulmar **20**

Jaantus 4.1: Qaabka Dakhligu uga soo Xeroodo Habka PSC - Faahfaahin **21**

Jaantus 4.1: Sharraxidda Qaabka Qaybsiga Xajmiga ku Dhisan **22**

Jaantus 4.1: Sharaxidda Qaybsiga Heerka Faa'iidada ka soo Baxda **23**

Jaantus 4.1: Sharraxidda Habka Qaybsiga R-factor **24**

Lifaaqyada

A Soogaabinta iyo Tixraaca Ereybixinnada

B Ku saabsan lataliyeyaasha

1 Musduleed iyo Hordhac

1.1 Musduleed

Agoosto, 2012, ka dib colaado sokeeye iyo nabadgelyo la'aan, Dawladda Federaalka Soomaaliya "**FGS"** ayaa la dhisay, iyada oo ay weheliyaan dastuur kumeelgaar ah iyo gol baarlammaan.yagleelidda FGS waxay ka dhignayd tallaabo muhiim ah oo ku aaddan in ay dhidibbada u aasto nabadgelyo waadha oo dibuga dhalata Jasiiradyarada Soomaaliyeed. Wali caqabado wawayn ayaa harsan, ha se ahaatee waxay ahayd uun si loo taageero ka miradhalinta in ulajeeddada la gaaro. Caqabadahaa waxay isugu jiraan kuwo siyaasadeed (sida in si cad loo qeexo qorshayaasha hanta iyo awood qaybsi ee muhiimka u ah guul laga gaaro qaabka federaalka iyo yagleelidda ha'ado dawli ah oo awood u leh in ay adeegga asaasiga ah bixiyaan) and kuwo qaab dhaqaale leh (sida soo xeraynta dakhli waafi ah oo lagu horumariyo dhimeyaasha kaabayaasha isgaarsiineed iyo bixinta adeegyada bulsho ee muhiimka ah).

. Khayraadyada saliidda iyo gaaska ee dhawan laga helay Bariga Afrika ayaa waxay la iman karaan fursad muhiim ah oo lagu gaadho xallinta dhibaatooyinka dhaqaale eek u foogan carriga Jasiiradyarada Soomaaliyeed, se isla khayraadka la helay ayaa lagamamaarmaan ka dhigaya in si cad loo qeexo xalka caqabadaha siyaasadeed ee kor ku xusan. Dhaqaalaha xooggan ee ka soo xerooda kheyraadka batroolka wuxuu keeni karaa saamayn xooggan oo isbeddel keenta. Se, waddada loo maro laga soo bilaabo helidda hore ilaa laga barwaaqoobo iyo waax dhaqaale ee saliid iyo gaas si wanaagsan loo mareeyaa waa hawl adag, dalal badinana waxay sababo kala duwan ugu guuldarraysteen gaaridda yoolka ka miradhalinta horumar lagu gaaro khayraad batrool. Dhab ahaan, aragtidheeri iyo qorshe waafi ah la'aantood, dalalka doonaya in ay ka faa'iidaystaan hantida khayraadka dabiiciga ah waxay sida badan noqdaan kuwo ka faqiirsan oo ka horumar iyo barwaaqo yar dalalka la mid ah ee aan khayraadka dabiiciga lahayn.

Waxaa jira dhawr siyaabood oo ay dalalku uga fogaan karaan caqabadda lagu magacaabo "Ibtilo Khayraad." Arrinta lafdhabarka u ah mid walba qodobbadaa waa qaadashada qorshe adag iyo hufnaan leh oo sharciyeed, xeerin iyo qorshe miisaaniyadeed oo si ugu wanaagsan looga faa'iideysto soosaaridda khayraadka saliidda iyo gaaska, iyada oo loo eegayo xaaladaha gaar ahaaneed ee dal. Bangiga Adduunku wuxuu u hawl galay kaalmo farsamo oo uu arrimahaa guul laga gaaro ka geysto. Mid ka mid ah allaabooyinka ugu horreeya ee yoolkaa lagu gaarayo waa dhiirrigelinta wadahadal iskaashi oo ka dhex curta Jasiiradyarada Soomaaliyeed, iyada oo (i) la astaynayo lana higsanayo in ay ka wada qaybqaataan dhaammaan heerarka federal, gobolleed iyo beeleed ee danuhu ugu jiraan, iyo (ii) raadinta in la yeesho qaab loo simayahay oo lagu helo aqoonta ku saabsan waaxda khayraadka batroolka iyo horumarinteeda. Habkaa aqooneed wuxuu u shaqaynayaa sidii goob laga duulo inta ka horreysa kulanka wadatashiga heerka sare ah ee u dhexeeya gobollada iyo federaalka, kaa oo looga gol leeyahay gaaridda heshiis lahaanshiyeed, maamulid, iyo qaybsiga dakhliga soo xerooda, iyada oo intaasiba ay qayb ka yihiin geeddisocodka dastuur.

1.2 Hordhac

Iyada oo qayb ka ah qorshaha geeddisocodka kor ku xusan, Bangiga Adduunku wuxuu heshiis la galay Hunton & Williams oo ka mid koox lataliyeyaal ah gacan ka geysan doona xiriir warqado aqooneed iyo qoraallo la xiriira oo ku saabsan qodobbo farsamo oo lug ku leh waaxda khayraadka batroolka. Qoraalkani waxa uu diiradda saari doonaa fikradaha saldhigga u ah waaxda dhaqaale ee khayraadka batroolka: (i) qaababka sharcidejineed ee waaxda khayraadka batroolka ee hab dawladeed oo federal ah, iyo (ii) heshiisyada batroolka iyo qorshayaasha miisaaniyadeed ee la xiriira. In si qumman loo dhiso qaabka sharcidejineed ee lagu dhaqayo waaxda khayraadka batrool ee dalku leeyahay, heshiisyada batroolka iyo qorshaha miisaaniyadeed ee seeska u noqonaya maalgishayadu waa qaybo muhiim ah oo ka mid ah soojiidashada maalgahsiga dibadeed, iyada oo isla markaa la xaqiijinayo in dalka la maalgashanayo uu faa'iidada u soo xeroonaysa khayraadkiisa dabiiciga ah si wanaagsan u hanto. Qaybaha soo socota waxaa lagu falanqayn doonaa qaababka lagu yaqaan sharci iyo xeer guulaysta oo ay yeelato waaxda dhaqaale ee khayraadka dabiiciga ah ee habdawladeed federal ah leeyahay.

2 Qaababka Sharci'udejinta Khayraadka Batroolka ee Federaal [1]

2.1 Guudmar

Dhammaan dalalka leh khayraadka batroolka waxaa soo wajaha caqabada yagleelidda qorshe sharci'udejin qumman iyo xeerar qayaxan oo lahu dhaqo waxsoosaarkaa. Se in caqabadahaa la wajaho waa arrin muhiim ah oo lagu xaqiijin karo in dalka iyo dadkiisuba ay gurtaan miraha ay istaahilaan ee uga soo go'a khayraadkoodaa. Sharciyadaha iyo xeerarka batroolka sida tooska ah u qeexa dhammaan arrimaha muhiimka ah ee ka si caadada ah dhasha horumarinta soosaaridda khayraadka batroolka waxay gacan ka geystaan yaraynta khilaafyada iyo colaadaha dhex aloosmi kara maalgashadayaasha shisheeye iyo dadka dalka guhiisa labadaba. Gaar ahaan, maalgashadayaasha shisheeye waxay doonayaan xasillooni ka ay helaan in mid walba oo arrimahaa muhiimka ah ka mid ah si qumman loo lafaguro. Marka dal aanay u kala caddayn qodobbadaa ama aanu la haysan xeerarka qumman ee heer caalamiga looga dhaqmo, maalgashadayaasha shisheeye waxay doonaan caymis damaanadqaad sare leh oo ay u helaan wixii maalgashi ah ee ay dalkaa la damcaan.

Marka laga yimaado baahida guud ee loo qabo in ay qeexanyihiin qorshaha shawciyada iyo xeerarka lagu dhaqayo khayraadka batroolku, dalalka qaabdawladeedka federaalka ah ku dhaqma waxaa soo foodsaara caqabado kale oo dheeraad ah , kuwaa oo laga magacaabi karo kuwa ay ka midka yihiin isudheellitirka xuquuqo hoosaadka qaran, madaxbani hoosaadka siyaasadeed iyo baahida horumarinta qaran, wadaxiriirka siyaasadeed iyo qaybta gobolladu ku leeyihiin arrimahaa. Marka iyana dhinac la iska dhigo baaida loo qabo qayaxid ujeeddo, si loo soo jiito maalgelin loo helo waaxda khayraadka batroolka, caqabaddan dheeraadka ahi waxay u baahantahay in si kafiirsasho leh loo lafaguro iyo gorgortan dhex mara inta datu ugu jirto ee heer qaran iyo mid goboleedba leh si loo sugo in dhammaan inta dantu ugu jirto heshiis ku yihiin sidii qorshe khayraad batrool loo qaabayn lahaa.

Qorshe qeexan si fiicanna looga fikiray oo ay yeelato waaxda khayraadka batroolku isla markaana hela taageerada dhammaan inta dani ugu jirto waxa uu seeska u dhigi karaa qaybsi sinnaan ku dhisan oo laga gaaro faa'iidooyinka badan ee ka dhalan kara horumarinta waaxda khayraadka dabiiciga ah ee batroolka. Qorshayaasha batrool ee aan lahayn ulajeeddo qeexan iyo / ama aan helin taageerada daneeyeyaasha muhiimka ah, si ay ahaataba, waxa uu khatar ugu jiraa in uu kciciyo ama sii fogeeyo khlaaf ka dhex aloosma dhinacyada danta ka leh.

Tallaabada ugu horreysa ee lagu gaaro yoolkan waa in mid walba oo daneeyeyaasha ka mid ahi uu fahan asaasi ah u leeyahay sida dejinta qorshe sharciyo iyo xeerar lagu dhaqo waaxda bkhayraadka batroolka loo qaabeeyo. Ma jirto hal jawaab kaliged saxan

[1] Fiiro gaar ah: Waxaan garowsannahay in kooxda Bangiga Adduunku uu ku gudajiraan qorshe ay ku soo saarayaan fikrad istiraatiijiyadeed oo ku aaddan xiriirka ka dhexeeya qorshaha sharciyeed iyo kan siyaasadeed ka dhex muuqda dastuurka. Sidaa awgeed, faallaynta arrintaa eek u qoran qoran qoraalkan hordhaca ah wax ayaa laga beddeli doonaa si loo waafajiyo kan fikradda istiraatiijiyadeed ee kooxda Bangiga Adduunka, si loo sugo islajaanqaad arrintan ay ka yeeshaan qoraallada iyo soojeedinnada kala duwan ee mshruucani ka koobanyahay.

oo loo helayo sida loo dhiso qorshhyaashaa, se waxaa jira qodobbo muhiim ah oo gacan ka geysan kara xaqiijinta in qorshahaasi uu si cad ugu qeexanyahay inta danuhu ugu jiraan ee gudaha dalka (oo gacan ka geysanaya yaraynta khilaafaadka gudaha marka faa'iidooyinka khayraadka ay bilowdaan) iyo maalgashadayaasha dibedda (oo gacan ka heysata soo jiidashada maalgelinta, si faa'iidooyinka laga helo khayraadka batroolka marka ugu horreysa).

Qodobbada tixgelinta muhiimka ah leh ee mid walba oo ka mid ah arrimaha qorshaha sharciyada iyo xeerarka waaxda khayraadka batroolka, siiba dastuurka, sharciyada batroolka iyo xeerarkiisa iyo heshiisyada laga gaaro xagga hoose ayaa lagu qaadaadhigayaa.

2.2 Arrimo Dastuur oo Muhiim ah

Dastuurka dal wuxuu badanaa seeska u dhigaa xeerarka adag iyo arrimaha kale ee lagamamaarmaanka u ah ee ay u badantahay in aan wax laga beddelin ka dib marka la hirgeliyo. Arrinta ugu mudani waa xaqiijinta waax batrool oo si siman looga faa'iido oo xasilloon, siiba federaallada ay ka dhex jiraan khilaafyo gudaha iyo dibeddaba la xiriira, waa qorshe adag si fiicanna u qeexan oo lagu sugo qaybsiga dakhliga ka soo xerooda khayraadka batrool.

Arrinta ku saabsan qoondaynta dakhliga ka soo xerooda khayraadka batroolka waxaa ka dhashaa arrimo badan oo xasaasi ah ayna adagtahay in la xalliyo. Arrimahaa xasaasiga ah oo badanaa lagu xalliyo heerka dastuur waxay isugu jiraan kuwo juquraafi (qoondaynta u dhexaysa dawladda dhexe, maamullada gobollada iyo dawladaha hoose), waqtiga qaaondaynta waqtiga jooga dakhliga loo adeegsado horumarinta iyo dhimidda cayrowga iyo sanduuqyo loo kaydiyo adeegsiga jiilasha dambe, ilaa (u qoondaynta jaangooyooyinka guud ama mid ka mid ah sanduuqyada kala duwan ee maaraynta ee aadka loo adeegsado, sida xasilinta, horumarinta iyo sanduuqayda madaxa bannaan ee hantiyeed).

2.2.1 Tixgelinta Juquraafiyeed

Khayraadka batroolka badanaa juquraafi ahaan isu ma dheellitirna, taa oo keenaysa su'aasha ah sidee ayay suuragal ku tahay in la go'aansado qoondayn dhexdhexaad ka aha danaha maammulada hoose ee qaran iyo sidaa oo kale danaha qaran iyo kuwa maamulhosaadyada. Hal wqaddoo oo loo maro isu dheellitirka danaha qaran iyo baahida loo qabo horumarin qaran oo ay wheheliyaan danaha maammulada hoose waa in boqolkiiba ino goan oo ka mid dakhliga laga helo khayraadka batroolka oo si joogto ugu go'a daneeyeyaasha kala duwan ee heer qaran iyo maamullada hoose. Qaabkaa oo laga adeegsaday dalka Indonesia waa mid qeexan aan se loodasamayn, gaar ahaan boqolkiiba inaha dastuurku jideeyay iyo in ay adagtahay in dastuurka wax laga beddelo. Dalaka kale, sida Nigeria, waxay door bidaan qaybsi ku dhisan boqolkiiba in, se waxay talada go'aaminta boqolkiiba inta noqnayaan oo muddooyin kaldhaaf loo dejiyo.

Marka laga hadlayo qoondaynta ka dhexaysa dawladaha hoose, dalal oo ay Suudaan ka mid tahay qoondo ayay siiyaan dawladaha gobollada si ilaa her ku salaysan in

gobolku yahay mid batrool soo saaro iyo in kale.[2] Dawladaha qaar waxay dakhli u qoondeeyaan gobollada batroolka soo saara kaliya; kuwo kalena, sida Nigeria, waxaa dhacda in ay sababo tixgeliyaan, sida isudheellitirka gobollada, inta ballaca gobolku la'egyahay iyo arrimo kale oo la halmaala.

Arrin lala xiriiriyo qoondaynta qoondaynta juquraafi ahaaneed waa kartida dawladaha hoose ee qaranku ay u leeyihiin xagsashada lacagta aadka u tirade badan ee ka iman karta boqolkiiba inta go'an ee laga siiyo ama qoondaynno u dhigma marka batroolka aad u badan la helo. Haddii la doorto qoondayn ku dhisan boqolkiiba in go'an (ama dhab ahaan, qoondayn walba oo oo keeni karta dakhli u soo xerooda dawladaha hoose oo aad uga badan intii ay maammuladaasi maarayn jireen), waa in la qaadaa tallaabooyin lagu sugayo in dakhliyadaa si qumman loo maamulo. Tallaabooyinkaa waa in ay ku jiran kuwo ku aaddan dhisidda kartida lagu maamulo heerka ay le'egyihiin dakhliyadaa inta aan qoondada aan lagu wareejin. Haddii si kale loo dhigo, kartida maamulka qoondada la la damacsanyahay uu si qumman ugu maamuli karo dakhliyadaa u soo xeroonaya waa in lagu sii xisaabtamaa marka la go'aaminayo qoondaynta dakhliyada batroolka ka soo xerooda; dhisidda kartiyeed waa in talada lagu daraa, si awoodda maamul ee qolooyinka ka la duwan ee la siin doono dakhliga batroolka loo la simo tan heerka ay le'egtahay qoondada in la siiyo loo cayimay.

2.2.2 Tixgelinaha Waqtiyeed

Marka laga hadlayo qoondaymaha waqtiyeed, dalalka la soo gudboonaada laba ka la doorasho oo ha; in ay dakhliyada batroolka ka soo xerooda ku daboolaan baahiyaha hadda taagan ama in ay u adeegsadaan qaarkood ama dhammaan dakhlilyadaa timaaddooyinka dambe. Dalaka soo koraya badanaa waxaa soo foodsaara baahiyo daran oo markaa taagan, oo ay ka mid yihiin horumarinta kaabayaasha isgaarsiineed, yaraynta saboolnimada iyo horumarina waxbarshada. Dalalka oo kale waxaa dhacda in ay doortaan dakhliyada batroolka ka soo xerooda ay si degdeg ah baahiyahaa jira ugu adeegsadaan, si ay horumariyaan nolosha dadkooda hadda jooga, intii ay dakhliyadaa u duwi lahaayeen sanduuqyo kayd oo timaaddada kaliya loo adeegsado. Taa waxay qayb ka tahay fikradda ah in wax ka qabashada baahiyahaa ayan kaliya waaga taagan faa'iido ugu jirin e jiilasha soo socdaana ay sidaa oo kale ka faa'iidi karaan.

Dhanka kale, dalalka sida wayn u horumaray waxaa dhacda in aanay haysan baahiyo degdeg ah oo gudahooda a jira una baahan in dakhliga batroolka ka soo xerooda lagu daboolo. Dalalkaa oo kale waxaa dhici karta in ay door bidaan in ay xig wayn oo ka mid dakhliyada batroolka ay ku maalgashadaan sanduuq kayd oo lagu magacaabo sovereign wealth fund ("**SWF**"), kaa oo loogu talo galay kayd jiilasha dambe loo dhigayo.

2.2.3 Arrimaha kale ee la Xiriira Siyaasad-u-dejinta Qoondaynta Dakhliga

Dakhliayada batroolka ka xerooda waxaa kale oo loo qoondayn karaa oo lagu maamuli karaa adeegsiga noocyada kala duwan ee sanduuqyada kaydka ee loo sameeyay gaaridda yoolasha siyaasad-dejineed. Marka laga reebo qoondaymaha ku dhisan

[2] *See generally* EI Sourcebook, *available at* http://www.eisourcebook.org/699_87RevenueAllocation.html.

juquraafiga iyo waqtiga eek or ku xusan, waxaa jiraa in kale oo yoolal siyaasad-dejineed ah oo dalalku dalban hoolin karaan in ay gaaran iyaga oo u maraya sanduuqyada kaydka la maamulo ah. Yoolashaa siyaasad-dejineed waxaa ka mid ah; (i) xanaftirka saamaynta xisillonidaradda dakhliyada ee ka dhalan karta isrogrogga sicirrada saliidda ceeriin, iyada oo loo marayo habka loo yaqaan sanduuqyada xasillinta dakhliyada saliidda (oil revenue stabilization accounts, "**ORSAs**"); (ii) waxkaqabashada cadaadiska heerka sarrifka, si looga fogaado waxa loo yaqaan "Dutch Disease"; (iii) iskudhafka waxsoosaarka warshadaha; iyo (iv) in qoondaymo gooni ah loo sateeyo yoolal dhaqaale oo gaar ah. Mararka qaar, sanduuq qura ayaa loo adeegsadaa in lagu xalliyo yoola tiro badan. Tusaale ahaan, SWFka Norway wuxuu isku jamciyaa qoondayn waqtiyeed (in dakhliyada batroolka qoondo loogu kaydiyo jiilasha dambe) ay weheliyaan yoolal laga leeyahay xasilin isbeddelka sicirrada iyo dejinta heerka sarrifka.

Qoondaymahaa kala duwan kii la doorbidaba, dakhliyada ka soo xerooda khayraadka batroolka in si sugan oo ururiyo waa lagamamaarmaan. Dakhliyada batroolka badanaa meel dhexe ayaa lagu ururshaa, si loo sugo in dakhliyada ka soo baxa khayraadka dal si sugan oo xisaabtan qumman leh loo soo ururso in dal aanu u qoonday sida la door bido.

Arrinta khatar guud ku wada ah doorashoouinka qoondaynta dakhliyadaa batroolku waa baahida loo qabo in la meelmariyo geeddisocod dheer oo wadatashi ayna ka ka qayb qaataan dhammaan xubnaha muhiimka ah ee dantu ugu jirto, si loo helo heeshiis loo dhanyahay oo laga gaaro habka qoondaynta ugu wacan ee dal iyo baahiyihhsa gaarka loo qaadanayo ay noqonayso. Sida wanaagsan, heshiiskaa waa in la gaaraa inta aanay dakhliyada batroolku bilaaban soo xerayntoodu.

2.2.4 Lahaanshada Batrool iyo Arrimo Kale

Dastuurradau badanaa waxay xusaan arrimo kale oo wheliya qoondaynta dakhliyada oo la xiriira khayraadka batroolka, markaa oo badanaa tixgelinaha kale ay la xiriiraan sidii loo astayn lahaa lahaanshada batroolka iyo arrimo gaar ah oo l xiriira xagga hufnaanta xisaabtanka. Marka ay noqoto lahaanshada batroolka, dalalka qaarkood waxay qaateen hab lahaanshada u damaanadqaadaya qof ama shirkadda haysta xuquuqda dhulka batroolku ku jiro (sida Maraykanka). Dastuurrada qaarkood waxay lahaanshiyaha khayraadka batroolka siiyaan gobolka, haddii ay dawladdaasi federal, gobolaysi ama hab iskujir ah tahayba. Tusaale ahaan, dalka Kanada lahaanshaha khayraadka dabiiciga ah waxaa la siiyaa degmooyinka khayraadkaa carrigooda laga helo; dalka Nigeria lahaanshada khayraadku waxay u dhawrantahay dawladda federaalka.

Arrinta lahaanshada waxaa laga dhigi karaa mid ka gooni ah gacakuhaynta dakhliyada ka soo xerooda khayraadka. Tusaale ahaan, Suudaanta Koofureed iyo tan Waqooyi waxay ku heshiiyeen hab dakhli qaybsi iyada oo aan heshiis laga gaarin arrinta laahaanshada, heshiiska *Comprehensive Peace Agreement* loo yaqaan ee sannadkii 2005 ay wada dhigteen. Se, madmadowga la xiriira arinta lahaanshada ee hab dawladeed federal ah waxay noqon kartaa arrin ay isku khilaafaan maamullada heerka qaran iyo goboleed, waxayna ku dambayn kartaa arrin isu rogta mid khatar siyaasadeed ku noqota maalgashadayaasha (kuwaa oo markooda saamayn taban ku yeelan kara dakhliyada batrool ee dal soo gala). Marka dhankaa laga eego, waa muhiim in arrimahaa

sia cad look ala qeexo si looga fogaado wareer iyo khilaaf yimaada, hadii dastuurka lagu qoro ama meelo kale oo sharciyada iyo xeerarka batroolka ee dalka lagu xusaba.

Dastuurradu waxaa kale oo ku jiri kara qodobbo gaar ah oo loogu talagalay hufnaanta, si loo sugo xisaabtan qumman oo ka jira waaxda dhaqaale ee khayraadka batroolka. Dastuurka Kenya, tusaale ahaan, waxaa ku yaal qodob dhigaya in heshiisyada batroolka uu ansixiyo golaha sharcidejintu, ka hor inta aanay dhaqan gelin. Qaabkan marka loo eego, heshiisyada batroolka dadka ayaa loo soo bandhigaa (ugu yaraan ilaa heer), taa oo yaraynaysa musuqmaasuq dhici kara.

2.3 Tixgelinaha ugu Mudan ee Sharciyada iyo Xeerarka Batroolka

Qodobbada la xiriirra khayraadka batroolka ee dastuurka waxaa soo raaca qodobbo kale oo la xiriira sharciyada iyo xeerarka oo sida caadada ah ka kooban dhawr qodob: (i) sharci loo dejiyo batroolka oo ah sharciyayn waaxdaa dhaqaale guud ahaanteeda, kaa dejinaya xeerarka guud ee lagaga dhaqmayo waaxdaa, (ii) xeerar batrool oo kala dhigdhigaya qorshayaasha fulinta qodobbada ku dhigan sharciga batroolka, iyo (iii) shacidejinnada kale ee la xiriira eek u batroolka u gaar ahayn se saamaynta ku leh arrimo batroolka la xiriira. Qodobbadaa kale ee sharcidejineed waxaa mar walba ka mid ah kuwo guud ahaan ka wada dhexeeya waaxda tamarta oo dhan, kuwaa oo meelayn kara qaybo badan oo ka mid doorarka iyo xilalka waaxdaa (haddii doorarkaa iyo xilalkaa aanay dastuurku ama shacyada batroolku meelayn) , iyo sidaa oo kale sharciyada kale ee guud (sida sharciyada dhulka ee maamula helidda iyo magdhawga dhulka looga baahdo horumarinta waxsoosaarka batroolka).

2.3.1 Doorarka iyo Xilalka Waaxda Batroolka

Iyada oo aan loo eegayn halka lagaga dhigayo sharciyada iyo xeerarka, dhammaan sharciyadaasi waa in ay si cad u meeleeyaan xilka waxqabad ee waax walba oo batrool (siyaasad-dejinta, qulqulka sare, iyo kan dhexe/hoose, oo mid walba hoos lagu falanqayn doono). Ka la calaamdinka xilalka waxaa laga fogaanayaa iskunoqnoqka xilalka iyo xilalka isu eg qaarkood oo aan muhimaddii loo baahnaa helin, taa oo hawsha curyaamin karta. Kala caddayn la'aan ka jirta doorarka iyo xilalka waxay keeni kartaa iskhilaaf daneed, tayada xisaabtan oo hoos u dhacda, dicudhacyo aan laga soo kabsan oo awoodda go'aanqaadasho la xiriira iyo maalgashadayaasha oo aad dareen uga qaada khatar uga timaadda doonana faa'iido badan oo ay khatarta faa'iidada ay maalgashigooda ka filayeen ku timaadda daboosha. Haddii lagu guuldarraysto in arrimahaa la is la meel dhigo waxay horseedi kartaa faa'iidada dal ka heli lahaa khayraadkiisa batrool oo hoos u dhacda.

(a) Siyaasad-dejinta

Dalal badan hawsha siyaasad-dejinta waxaa qaabbilsan wasaaradda u xilsaaran tamarta, sida wasaaradda Batroolka iyo Tamarta ee Norway, Wasaaradda Tamarta ee Ghana, Wasaaradda Khayraadka Macdanta ee Mozampique, Wasaaradda Macdanta iyo Tamarta ee Tanzania, Wasaaradda Tamarta iyo Macdanta ee Indonesia, iyo kuwo kale oo badan. Ha se yeeshee, habdawladeedyada federaalka ah qorshaha sharci iyo xeer

waxaa laga rabaa in uu dejiyo qaabka iyo heerka talabixnta siyaasad-dejineed ee la siinayo dawladaha hoose. Tusaale ahaan, dalka Ciraaq, dawladda federaalka iyo maamullada gobollada iyo degmooyinka ay taladu ka go'do waxay qaybsadeen xilka dejinta siyaasad istiraatijayeed ee lagu horumarinayo khayraadka batroolka, si dadka reer Ciraaq ay uga faa'iidaystaan.

Sida arrinta qoondaynta dakhliyada, casharka ugu muhiimsan ee laga bartay waaya'argnimada caalamiga ah waa in doorka siyaasad-dejinta si cad loo qeexaa, si dhamaan xubnaha ay khusayso (oo ay ku jiraan kuwa dantu ugu jidho ee gudaha iyo maalgashadayaasha dibeddu) ay u fahmi karaan siyaasadda lagu dhaqo waaxda khayraadka batrool ee dal leeyahay.

(b) Doorarka Quqlqulka Sare

Qulqulka sare ee waaxda batroolka waxaa ka mid ah in la fuliyo yaboohin dadwayne marka heshiisyo batrool la gelayo, ka gorgortanka heshiisyada batroolka, u hoggaansanaanta qandaraasyada iyo maamulka (oo ay ku jiraan sugidda u hoggaansanaanta ganacsi, farsamo, caafimaad, nabadgelyo iyo qodoobada ilaalinta deegaanka ee heshiisyada iyo sharciyada u yaal), iyo kaqaybqaadashada dawladda (qaab qummiye ama wakiil dawladeed oo uga qayb gala maalgashiyada ganacsiyeed).

Doorarka xileed badanaa waxaa loo qaybiyaa qaab u dhexeeya wasaarad qaabbilsan, hawlwadeenno wasaaradda hoos taga, iyo shirkad batrool oo dawladdu leedahay. Tusaale ahaan, dalka Netherlands, Kormeerka Kaawooyinka ee Dawladdu waa hay'ad sare oo hoos timaadda Wasaaradda Arrimaha Maaliyadda, waxaana loo xilsaaray kormeerka qulqulka sare ee batroolka (oo ay ku jiraan caafimaadka, nabadgelyada, iyo ilaalinta deegaanka). Wasaaradda Maaliyadda ruuxeeedu ayaa u xilsaaran bixinta shatiyada soosaaridda batroolka.

Dalka Muzampique, Wasaaradda Khayraadka Macdanta ayaa u xilsaaran bixinta qandaraasyada sahmineed, se mas'uuliyadda sugidda in hawlagallada soosaaridda batroolka loo fuliyay si waafaqsan sharciyada yaal iyo heshiisyada qandaraaseed waxaa loo dhiibay Machadka Batroolka Qaranka (National Petroleum Institute ama "**INP**").

Dhanka kale, Hay'adda Petroleum Regulatory Authority ee Ghana waxay u xilsaarantahay ilaalinta iyo korjoogtaynta hawlaha waaxaha qulqullada sare iyo dhexe ee batroolka, dalka Mexico hay'adda National Hydrocarbons Commission oo ilaalisa korjoogtaysana hawlaha sahaminta iyo soosaaridda hyrdocarbonnada iyo keydintooda, gaadiidka iyo sifeynta batroolka waa hay'ad madax bannaan oo shaqadeeyo tahay qulqulka sare, intii ay ahaan lahayd mid hoos tagta wasaaradda qaabbilsan batroolka.

Mar kale, hababka federaaalku waa in ay tixgeliyaan in xilalkaa ay dhamaantod qabanayaan hay'adaha federaalka, dhammaantood ay buuxinayaan dawlaha degaanku, ama hab kale oo iskudhaf labadaa ah. Badanaa g'aammadaa oo kale waxaa ka soo baxa oo tixgelinood, sida; (i) heerarkee dawladeed ayaa yeelan kara kartida (ama la dhisi karaa in ay karti u yeeshaan) in ay hawlahana muhiimka ah fuliyaan; (ii) ilaa heer intee la'eg ayaa la iswaafajin karaa sharciyada, xeerarka, qodobbada qandaraas, iwm; iyo (iii)

heerkee/heerarkee dawladeed ayaa sida ugu waafisan looga la xisaabsatami karaa maaraynta xilalka qulqulka sare ee khayraadka ee batroolka.

Habkii la qaataba waxa uu isla sidii u baahanyahay in si cad loo sharraxo. Tusaale ahaan, waxay u badantahay in maalhashadayaashu ay heshiis u qalma ku maalgashadaan marka ay kala caddahay hay'adda qaabbilsan qabashada qandaraasyada ee heshiisyada patrool geli karta.

(c) Doorarka Qulqullada Dhexe iyo Hoose

Xilalka muhiimka ah ee sida caadada ah loo la kala cayimo sharciyada shidaalka ee qulka dhexe iyo kan sare waxaa ka mid ah xeerinta canshuuraha raasamaalka hawlgalka qulqulka dhexe, sida tuubbooyinka iy rugaha LGNka, sugidda in si waafi ah loo adeegsado gaadiidka hawlgalak qulqulka dhexe iyo kartida sii ka la gudbinta ee qulqulk hoose, nabadgelyada marinnada tuubbooyinka iyo LGNka, ilaalinta deegaanka, iyo ka qaybgalka dawliga ah ee dhismha kaabayaashaisgaarsiineed ee qulqullada dhexe iyo hoose. Waxaa muhiim in la sugo sidii shaqooyinka xeeriyaha iyo hawlwadeenka hay'adaha bulshadu wada leedahay si cad loo kala saaro, taa ah ah habdhaqanka ugu wanaagsan ee duniga laga adeegsado. Haddii xeerinta goynta sicirku ay shaqada ka mid tahay (sida tan qulqulka dhexe iyo kan hoose), badaxbannaanaanta hay'adda sicirradaa xeerinaysaa, si looga hortago saamayn siyaasad aan loo joogin oo dhaqdhaqaaqa suuqa saamaysa.

Tusaale, hay'adda madaxa bannaan ee Taliska Xeerinta Tamarta iyo Adeegga Biyaha dalka Tanzania waxay awood u leedahay in ay xeeriso heerarka qiimaha adeegsadayaasha lagu dallacayo, se awooddeeda xagga xeerinta batroolka waxay ay ku xaddidantahay uun gaadiidka and sii qaybinta. Hay'adda taa la mid ah ee dalka Indonesia waxay u xilsaarantahay hawlaha qulqulka dhexe iyo kan hoose ee waaxda shidaalka, iyo goynta canshuuraha la saarayo gaadiidka iyo qiimaha laga qaadayo adeegsadayaasha waawayn ee xaafadaha iyo kuwa yar yar.

Marka laga xagga ka qaybqaadashada dawliga ah ee marinnada tubooyinka batroolka qaada, CMGga dalka Musampique (hay'ad 80% hoostagta tan kale ee dawaladdu leedahahay ee EHN, 20% harayna is la dawladduu leedahay) waxay ka qaybqaadataa hawlaha dhuumaha gaaska dabiiciga ah qaada. Hay'adda TPDC ee dalka Tanzania waxay ku lug leedahay mashruucyo ka la duwan oo ah kuwa dhuumaha shidaalka qaada. Mashruucyada dhuumuhu waxay kale oo si isdabajoog loogu qaabeeyaa wadalahaansho guud-gaar isugu jirta, public-private partnerships ("**PPPs**").

2.3.2 Arrimaha kale ee Muhiimka u ah Qorshayaasha Batroolka

Hawlaha ka la magacaabidda xilalka iyo doorarka gudaha waxxda batroolka, sharciyada iyo xeerinnada batroolku waxay kale oo dejiyaan hawlaha qaabdhiseed ee muhiimka u ah waaxda oo dhan, kuwaa oo ah inta u dhxaysa goynta shatiyada iyo bixinta qandaraasyada ilaa arrimaha ilaalinta deegaanka, ka saadashada degaaneed iyo xeerarka hufnaanta shaqo.

(a) Shatiyada iyo Bixinta Qandaraasyada

Dalalka aan hore looga helin wax batrool ah, badanaa sharciyda batroolku waxay shatiyada iyo qandaraasyada bixiyaan iyada oo aan la adeegsan hab tartan yaboohineed lagu ka la helayo, iyada oo ay jirto in qandaraaslayaal tiro yar uun ay daneeyaan sahaminta dal aan hore khayraadkaa looga helin, waxay u badantahay in aan la helin shiorkado ku filan tartan qumman oo loo galo helidda shatiga sahaminta oo keena in yaboohin adag lagu ka la guuleysto.

Marka dalaku ay waaya'aragnimo u yeeshaan helitaanno badan oo khayraad shidaal ah, qandraaslayaal badan ayaa xiiseeya sahminta batroolka dalalkaa, xiise badan wuxuu keenaa jawi tartyan qumman ku dhici karo, taa oo macnaheedu yahay in ay u badato in dawladdu ay awood u yeelato suuragelinta qodobbo heshiis oo danaheeda u janjeera, marka hawsha bixinta qandaraasyadu qaab tartan laga dhigo. Hawshani caado ahaan waxay isugu jirtaa ku bixinta qandraayada hab naadin guud ah (marka laga reebo xaalado gooni ah).

Tusaale ahaan, dalalka Angola iyo Mozampique, mid walbaa qaab naado guud ayuu ku bixiyaa qandaraasyada, waxa se kale oo uu oggolaadaa habab kale oo ku habboon xaalado gaar ah, sida; gortanno toos ah ama is barbar socda oo ka dambeeya marka naado guud ay u guuldarraysato in wax baayaca la waayo.

Naadooyinka guud ee loo dhigo shatiyada iyo qandaraasyada batroolka waxaa loo qabtaa qaabab iyo xeelado kala duwan, ma na jiraan xeelado gaar ah oo la oran karo waa kuwa ugu "wanaagsan."[3] Ha se yeeshee, waxaa jira qaabab guud oo badankoodu si u la xiriira yaboohinta qaybtanka faa'iidada la helo, mashruucyada shaqada sahaminta , iyo gunnooyinka lagu kala qaato saxiixa heshiisyada. Tusaale ahaan, wareeggii yaboohinya dalka Suriname ee Janawari 2013 wuxuu ku salaysnaa wajiga koowaad ee hawlaha sahaminta iyo qiime ugu hoosayn R-Fctor qaybtanka boqolkkiba in cayiman, kuwaa oo qandaraaslayaashu ay ku sii yaaboohiyaan boqolkiiba in kale oo lagu sii daray heer ugu hoosayneedyadaa mid walba.

(b) Arrimaha Deegaanka

Badanka sharciyada batroolka waxay ugu yaraan jideeyaan in qandaraaslayaashu uga soo baxaan xilalkooda si waafaqsan xeerarka u yaal waaxdan waxsoosaar eek u aaddan mas'uuliyadda ilaalinta deegaanka ee badanaa lagu magacaabo "habdhaqanka wacan ee goobaha batroolka laga soo saaro" ama magac u dhigma, in kasta oo heerka qeexitaanka magacaasi aad loogu kala duwanyahay.

Waxaa kale oo iayduna iska caado u ah sharciyada waaxda in qandaraaslayaasha laga dalbado in ay u hoggaansamaan guud ahaan sharciyada iyo xeerarka gudaha ee ka yaal ilaalinta deegaanka. Qorshayaasha ka sii ballaarani waxay kale oo jideeyaan in qandaraaslayaashu ay la yimaadaan warbixino ku saabsan qiimaynta saamaynta dad iyo deegaan uga iman karta iyo qorsheyaasha maaraynta ee looga fogaanayo waxyeello deegaan, iyo qorayaal qeexaya waxkaqabashaada shilalka deegaanka ku dhaca

[3] Hoos ka eeg falanqayn ku saabsan habka qaybtanka"R-Factor"..

(mararka qaarkood waxaa ku jira jidaynta in sanduuq kayd oo loo sii dhigo waxkaqabashada arrimaha ilaalinta deegaanka ku yimaada).

Habqorsheedyo badani waxay xlka bixinta magdhawga waxyeellada hawlgallada batroolka uga timaada deegaanka saaraan wandaraasleyaasha, ama waxay ku jideeyaan qandaraaslaha in uu hasyto caymis daboola waxyeelladaa oo kale,

Sharciyada casriga ah ee batoolka lagu dhaqo waxay kale oo jideeyaan in marka ay hawlgalladu goob ka dhammaadaan meeshaa lagu soo celiyo sideedii hore. Tani waxay noqon kartaa hawl kharash qaali ah ku kacda, waxayna keeni khatar ah in qandaraaslayaashu ay isku dayaan ka baaqsashada hawl ay dhaqncelin cusub goobta ka fuliyaan waaga waqtiga shatigoodu u dhammaado. Si taa looga hor tago, sharciyada qaarkood waxay jideeyaan dhigidda sanduuqyo kayd ah oo loo adeegado in dhaqancelinta deegaanka hawlagalka shidaalka lagu bixiyo.

Jaantus 2.1: Adeegsiga Sanduuq Kayd oo lagu bixiyo Mas'uuliyadaha ka dhasha Dhaqancelinta Deegaanka (PSC).



Belelinta gaaska dabiiciga ah waa arrin kale oo la xiriirta deegaanka oo badanaa lagu daro sharci'udejinta waaxda batroolka. Habdhaqannada qobol ama caalami ee jira waxay guud ahaan mamnuucid ku soo rogaan hawlgalka belelinta gaaska, marka laga ereebo xaalado gaar ahaaneed oo dhif ah, sida; tijaaminta ceelasha ama si dhanka nabadgelyada la xidhiidha. Belelintaa ayaa iyadana si taxaddar leh loo xeeriyaa loona ilaaliyaa. Dalalka Angola, Ghana, Mozambique, Nigeria, Tanzania iyo Uganda ayaa ka mid ah dalalka sidaa qaatay.

Intaa waxaa dheer, Bangiga Adduunku wuxuu wadaa *Global Gas Flaring Reduction (GGFR)* oo ah wadashaqayn loo la jeedo yaraynta belelinta gaasaska dabiicga ah ee dunida. GGFR wuxuu soo jeedinayaa sharciyayn buuxda oo si cad u qeexan oo ku aaddan arrinta belelinta gaaska, oo ay ka mid yihiin xeerinta , ilaalaynta iyo miisaaniyad dhiirigeliya adeegsiga gaaskoraadka la beleliyo iyo/ama ganaaxidda belelinta. GGFR waxaa kale oo u soo jeedinihiisa ka mid ah in la wax laga ogaan karo dhismeyaasha goobaha gaaska, dhuumaha gaaska qaada iyo rogaha lagu sifeeyo, in ay furanyihiin oo anay cidna takoorin, si loo dhiirrigeliyo adeegsiga gaaskoraadka badanaa la gubo.

(c) Shaqagelinta Degaanka

Hiregelin lagu guuleysto laga gaaro qodobbada jideynta shaqagelinta qandaraaslayaasha degaanka, waliba kuwa ku dambeeya in laga la haro teknoolijiyad adeegsigeedu sii waaro, aqoon farsamo, dhisme xoojiya awoodda waxsoosaar ee degaanka iyo in degaanka loo abuuro fursado shaqo waa ay adagtahay in la gaaro sababo kala duwan oo jira awgood. Waaya'aragnimada meelo badan oo dunida ka mid ah laga helay ayaa lagu arkay in isudheellitir qumman oo lagu sameeyo qodobbada jideynta sahqagelinta degaameed ee waaga la joogo iyo awoodaha hay'adeed ee timaaddada la filayo uu muhiim u yahay sida ay muhiim u tahay taageerada midaysan ee inta dantu ugu jirto.

Malaha jidka ugu wanaagsan ee loo maro sugidda in qodobbada jidaynta shaqagelinta degaanka ee lagu soo rogo qandraaslayaasha ay isugu dheellitiranyihiin si xisaabta loogu daro dhammaan waxyaalaha doorka ku leh, ayna awoodaan in ay watiga la jaanqaadaan marka kartida hay'adeed sii korodhaba, waa in sharciyaynta batroolku aanay amarkutaagle noqo (siiba horraanta) ayna gacan ka geysataa in inta dantu jirto ay lasocdaan ilaalinta horumarka shaqagelinta degaanka. Tusale ahaan, dalka Nigeria waxay aasaastay guddiga gaar ah oo la socda fuliyana qodobka shaqagelinta degaanka(in kasta oo ay Nigeria leedahay sharci amarkutaagleeya shaqagelinta degaanka, marka loo eego taariikhda dheer ee ay leedahay waaxda batroolka). Sharcidejintii dhawayd ee Nigeria waxaa iyadana ku jira qeexid cad oo ka hadlaysa waxa soo geli gara "shaqagelin degaan," taa qeexiddeeda si wayn la isugu raacsanyahay ay tahay: "Nigeria's recent legislation also includes a clear definition of what constitutes "local content," which definition is widely accepted in the industry: "the quantum of composite value added to or created in Nigeria through utilization of Nigerian resources and services in the petroleum industry resulting in the development of indigenous capability without compromising quality, health, safety and environmental standards."

Hirgelinta shaqagelin guuleysata oo abuurta fursado ganacsi, adeejisata oo isku ballaarisaa kartida jirta oo qiime ku kordhisa isla markaanaa abuurtaa jawi qiime ku kordhin joogto loo maarayn karo ah waxaa hubaal ah geeddisocod aayar aayar ah nqonayso. Sidaa awgeed, fikradda ugu mudiimsan sharcidejin walba oo arrintan ku saabsan waa loodsamidda amarkutaaglaynta ka madhan.

Waxaa kale oo badanaa dhacda aasaasidda sanduuq kayd tababar gaar ahaaneed oo ah kan ay shirakaduhu ka ururiyaan inta uu dhigayo heshiiskii qandaraaska batroolku, kaa oo ay tahay lagu shubo kaydka laga lagu lana bixi kari amar laga helo maamulka u xilsaaran loona adeegsado ujeeddooyin tababar.

(d) Qodobbada Hufnaanta

Waxaa jira in si wayn dunida la isugu raacsanyahay muhimmada ay hufnaantu u leedahay dhiirrigelinta maamulwanaagga waaxda khayraadka batroolka. Waxkaqabashda arrinka hufnaanta iyo la xisaabtanku waxay u baahanyihiin qaadidda tallaabooyin badan, labaduba iskaa ah, dedaalka in badan oo dani ugu jirto, sida u hoggaasanka xeera *Extractive Industries Transparency Initiative* ("**EITI**"), kaa oo si guud

u doonaya shirkadaha khayraadka soo saaraa in shaaciyaan lacagta ay dawladaha siiyaan, dawladuhuna ay markooda ay warbixin EITI ku shaaciyaan inta ay helaan, iyo qodobbo khasab iyo muhiim ah oo si fiican ugu cad sharciyada iyo xeerarka batroolka.

Jaantus 2.2: Qaabdhismeedka Warbixinnada EITI

Tixraac: EITI.org

Xilliga hadda la joogo, 32 dal (oo ka mid yihiin Ghana, Mozambique, Nigeria, Tanzania, iyo Zambia ayaa u hoggaansan EITI, iyada oo 16 dal oo kale hayaan jidka hergelinta qodobbada EITI.

Jaantus 2.3: Dalalka EITI



Tixraac: EITI.org (24 March 2015)

Iyada oo qayb ka ah baahida loo qabo sugidda hufnaan iyo xisaabtan sugan oo ka jira dhammaan heerarka kala duwan ee qiime ku kordhinta waxsoosaarka batroolka, qorsheyaasha shaeciyeed iyo xeerarka waa in ay (i) bixinta shatiyada iyo xuquuqaha sahaminta ku soo rogaan xeer sugaya hufnaan iyo tartan qumman oo loo simanyahay; (ii) yagleelaa hay'ado shaqadooda ka adag oo leh xilal kala qeexan oo aan isku soo laalaabanayn oo ku saabsan hawlgallada xeerinta iyo korjoogtaynta, kuwaa oo musuqmaasuq ka durka; (iii) jidaynta qorsheyaal miisaaniyadeed oo si cad loo baahiyoloo simayahay, togan, oo ka fogaada qorsheyaal ahaaneed oo qardoosi iyo in la yareeyo ka dhuumashada iyo la baxsashada canshuuraha; iyo (iv) in la dejiyo maamul dakhli oo hufan. Hufnaan la'aan ka jirta heerarka waxsoosaarka, kii uu doono ha haadee, waxaa ka dhalan kara warxumetashiil baaha iyo is aaminid la'aan xoogeysata, sharcidejin habboon waxa ay sugi kartaa in aanay sidaasi dhicin. Marka dalalku ay kor u qaadaan heerkooda hufnaanta ka jirta waaxda khayraadka batroolka, gaar ahaan u hoggaansanaanta EITI, waxay farriin tilmaamisa sida ay uga go'antahay in ka durkaan Ibtilada Khayraadka, waxayna gacan ka geystaan in ay caddeeyaan in dalku uuku suganyahay jawi ganacsi oo soo jiidan kara maalgashadayaasha.

2.4 Qaabka iyo Adeegsiga Habka Heshiisyada Batroolka

Heshiisyada batroolka ee sida faahfaahsan ugu xusan cutubka 3 waxay qaybo muhiim ka yihiin dedaalka dawalddu u gasho goosashada miraha khayraadkeeda dabiiciga ah. Doorkaa muhiimka ah darti, dawladuhu waxay si joogto ah isugu dayaan in ay u xasiliyaan qodobbada qaarkood oo ka yeelaan kuwo ay maalgashadayaasha waaxda batroolku hal meel ugu soo hagaagaan iyada oo la adeegsanayo sharciyada batrolka ee jira. Qaabkan waxaa lagu adeegsan qorshayaasha kala duwan ee miisaaniyadeed (sida qandaraasyada adeegga eek u jira sharciga yaal ee qandaraaska adeegga, heshiisyad yaal ee qoondaynta dhuleed ee laga helo carriga la sahaminayo ee loo maro xeerka gunnooyinka canshuuraha). Qandaraasyada qaybsiga waxsoosaarku waa kuwa ugu

badan heshiisyada batroolka, sidaa awgeed, qaybtani waxay diiradda saaraysa qandaraasyada wadaagga waxsoosaarka (am “PSCs”), se xeeraku guud ahaanna waa qabtaan noocyada ee heshiisyada loo adeegsado qorasheyaasha kale ee miisaaniyadeed.
Hal arrin oo horseeda adeegsi PSCs guuleysta waa sugidda in dalku leeyahay khayraadka loo baahanyahay, si loo suurageliyo in qandaraaslayaashu ay u hoggaansamaan sharciyada iyo mas’uuliyadaha heshiiska qandaraas. U hoggaansanaanta heshiiska qandaraasku mar walba waa muhiim, gaar ahaanna qaar ka mid ah qorshayaasha qaybsiga batroolka. Adeegsiga qaabka PSCs waxa uu wax wayn ka tari karaa gaaridda yoolkaa, iyada oo la xasilin meel loogu soo hagaago loo yeelayo mas’uuliyadaha saran qandaraaslayaasha badankooda.

Qaabka PSCs waxa uu si dhaw u la shaqeeyaa qorshaha dalka khayraadka laga soo saararayo ee bixinta qandaraasyada, iyada oo heshiiska batroolku oo u dhigayo dhammaan qodobbada guud oo qabta dhammaan qandaraasyada batroolka, sida:

(i) Xeerarka habdhaqanka guud ee qabta qandaraaslaha;

(ii) Soo wareejinta waaxda qandaraaska lagu siiyay;

(iii) Xayndaabqoolaabka (heerka qandaraaslayaasha loo oggolyahay in ay kharashka gala hal hawlgal sahamineed/waaxda qandaarska lagu siiyay oo lagu daboolaan dakhliga mid kale /);

(iv) qodobbda xasilinta (inta uu le’egyahay heerka qandaraaslayaasha laga gaashaamayo isbaddal sharci/canshuureed inta heshiiska qandaraasku jiro);

(v) mas’uuliyadaha ilaalinta deegaanka;

(vi) qorshaha waadaagga waxsoosaar; iyo

(vii) Xallinta khilaafyada/qodobbo dhexdhexaadineed.

Heshiiska la dhigto caado ahaan wuxuu meelo bannaan oo booscelis ah uga tagaa qodobbada yaboohinta qandaraas eek u qoran xeerarka bixinta qandaraasyada ee ku dhigan sharciga iyo xeerarka batroolka. Ku guuleystaha yaboohinta qandaraas ayaa dabadeed ka dheehda qodobbda guud qaabka PSC and kuwa u dhigan yaboohinta qandaraaslaha, oo lagu sii daray wixii qodobba kale ee laga gorgortami karo ah (kuwaa oo badanaa iska xaddidan).

3 Heshiisyada Batroolka iyo Qorshayaasha Miisaaniyadeed

3.1 Guudmar

Dalalka khayraadka batroolka leh, gaar ahaan kuwa aan waaya'argnimo dheer u lahayn hroumarinta khayraadka batroolka, waxay caado ahaan raadshaan shirakdo ajnabi oo horumarin ku sameeya khayraadkaas. Dalalkaa waxaa soo foodsaara tallan joogto ah oo udhexeeya rabitaanka dejinta qorshe miisaaniyadeed oo dalka iyo dadkiisa dakhliga ugu badan soo geliya, iyo dhanka kale, dejinta qorshe misaaniyadeed soo jiidan kara maalgashadayaasha, si khayraadka loo soo saaro.

Xallinta tallankani waxa uu u baahantahay in meel dhexe lagu miisaamo soo jiidashada maalgashadayaasha iyo u soo xeraynta deakhliga ugu badan dalka iyo dadkiisa. Qodobbada miisaaniyadeed ee sida wayn ugu xagliya xagga dawladdu saamayn tabanaan xooggan leh ayay ku yeelan karaan maalgashiga. Tan ugu sii daran, qodobbada miisaaniyadeed ee 100% dakhliga batroolka siinaya dawladda waxay u eguihiin kuwo loo boqogo, se ma jiraan qandaraasleyaal sidaa heshiis maalgashi ku gelaya, maxaa yeelay 100% ka 0$ waxsoosaar batrool waxa dawladda iyo dadkeeda uga soo baxayaa waa 0$. Iyada oo ay sidaa tahay, qodobbada miisaaniyadeed ee aadka ugu roonaadaan qandaraaslayda waxay u badantahay in ay ka dhalato faa'iido ballaaran, se waxay xaddidayaan dakhliga u xerronaya dalka khayraadka leh. Mar kale, haddii aa tan ugu xagjirsan soo qaadanno, qodobbda miisaaniyadeed ee 100% dakhliga batroolka ka soo baxa siiya qandaraaslayda waxaa ka dhalanaya xiise xooggan oo qandaraaslayaal badan soo jiita iyo maalgelin xooggan, se dalka khayraadka lehi wax faa'iido ah ka heli mayo khayraadkiisa dabiiciga ah - 0% dakhli walbaa wuxuu ku dambayn uun 0% oo dalkaa u soo xeroota.

Arrinta muhimmada ugu wayn u leh in la isugu miisaamo labada xaalood oo xagjirrada ah waa in xeerar dhawr ah loo hoggaansamo marka miisaaniyad la qaabaynayo iyo in la doorto nooca heshiis batrool ee ku habboon hirgelinta qorshahaa miisaaniyadeed.

3.2 Qodobbada Asaasiga u ah Qorshayaasha Miisaaniyadeed

Saddexda qodob ee ugu muhiimsan dejinta qorshe miisaaniyadeed batrool oo guuleysata waxay kala yihiin (i) lamadhaafaannimada qandaraaska; (ii) soojiidashada maalgashadayaasha; iyo (iii) samaynta qandaraasyo la maarayn karo oo leh qodobbo u hogaansamid qandaraas oo adadag.

3.2.1 Lamadhaafaannimada Xeerarka Qandaraaska

Qaddarinta lamadhaafaannimada qandaraasku waxay lagamamaarmaan u tahay soojiidashada maalgashiga dibedda ka yimaadda. Horumarinta khayraadka batroolka caado ahaa waa hawlgal dhaqaale oo xilli dheer qaata, maxaa yeelay dakhli la taaban karo heshiis batrool waxaa dhici karta in aanu ka soo xeroon ilaa 5-10 sannadood ka dib heshiiska ka dib kala saxeexashadiisa, waxayna noqoqon karta waqti ka sii dambeeya waaga maalgashadaha kharaskii ka galay uga soo noqonayo. Sidaa la mid,

qandaraaslayaashu waxay aad ugu badantahay in ay maalgashadaan dal marka ay ku kalsoonyihiin xasilloonida heshiiska qandaraas iyo qorshaha miisaaniayadeed.

Sidaa awgeed, waa qodobbada qandaraaska aan wax laga beddelin iyada oo aanay ku heshiin dhammaan dhinacyada qandaraasku ka dhexeeyo. Halkaa waxaa laga garanayaa in dalka khayraadka leh uu feejignaan iyo xilkasnimo muujiyo marka uu gelayo heshiisyo batrool oo timaadda fog la aqbali karo.

3.2.2 Soojiidashada Maalgashadayaasha

Guud ahaan, qorshayaasha miisaaniyadeed ee horusocodka ah ayay u soojiidasho badan maalgashadayaasha. Qorshe misaaniyadeed waa “horusocod” haddii uu yahay mid dawladdu u kordhiso hadba in faa’iidadu la’egtahay, taa oo macnaheedu yahay inta faa’iidada qandaraasluhu ay sii badataba waxaa sii badanaya qaybta dakhliga ka soo xerooda batroolka heshiiska qandaraaslahaa ee dawladda u soo gala. Qaabkan wuxuu sugayaa in heshiisku uu u dhanugulyahay ka falcelinta xilliga faa’iidadu badantahay ee badnaanta saliidda iyo gaas ama sicirka ay goooyaan saliidda iyo gaasku ay ka sarrayso sidii la filayay.

Qorshayaal miisaaniyadeed waa in sidaa oo kale lagu dhisaa jawi ay la tartamo karaan go’aammada kale ee maalgashi. Dal walba oo batrool leh wuxuu maalgashadayaasha soo hordhigaa xaalald tallan khasaare/faa’iido (macne ahaan, isu foodinta khayraadka dalka laga soo saari karo inta uu la’egyahay iyo qaybta dakhliga ka soo xerooda batroolka inta uu qandaraaslahu ku yeelanayo. Maalgashadayaashu qorshaha misaaniyadeed ee dal si gooni ah u ma dersaan ee waxay barbardhigaan oddoroska khasaare/faa’iido ee dalal kale. Tani waxay u baahantahay in dawladduu uu ay u falanqayso khatarta uga iman karta in dalal u dhigma la maalgashado iyo abaalgudka dalalkaasi ceshaan, iyo ay qorshaha miisaaniyadeed hadba ifafaalahaa lagu jaangooyo.

3.2.3 Uhoggaansanka Heshiiska Qandaraaska

U hoggaansamidda qandaraaska waxay muhimmad tan ugu sarreysa u leedahay sugidda in dawladuhu ay helana faa’iidooyinka ay xaqa u leeyihiin iyo in hawlgallada batroolka si habboon oo u qalanta heshiisnka batroolka iyo xeerinta guud ee heshiisyada batroolka. Halan waxaa soo gelaya u hoggaansamidda dhammaan sharciyada ganacsi, farsamo, caafimaad, nabadgelyo iyo deegaan ee qabta heshiisyada batroolka.

Heshiisyada batroolku badanaa waa qandaraasyo qaali ah oo abuura xiise badan oo labada dhanba ah. Qandaraaslayaashu waxay doonaan in ay in ay ku dadaalaan sidii ay qandaraas faa’iidada ugu badan u soo hoyiya inta ay dantooda ka wakiil yihiin, halka dhanka kale dawladdana xil ka saaranyahay in dadkeeda ay u sugto in xuquuqda sharciyaa dawladeed ee qandaraasyada qabta la meel mariyo.

Qaar ka mid ah heshiisyada batroolka, oo si faahfaahsan loogu falanqayn doono qaybta soo socota, kuwa kale waa ka fuduyihiin in maareeyo. Dalalka waaxahooda khayraadka batroolku soo korayo badanaa u hoggaansanaanta qandaraasyada iyo arrimaha maarayntu waa liidataa. Sida awgeed, inta ay fududdahay maaraynta iyo xisaabxirka

qorshe miisaaniyadeed ayay, waxaa fududaanaya in qandaraaslayaashu ay ku hawlgalaan si u qalnta sharciyada heshiishka lala galay dhigayo.

3.3 Noocyada Heshiisyada Batroolka ee Caanka ah

Heshiisyada batroolku waxay qeexaan qaabka horumarinta khayraadka batrool ee dal ay yeelanayso iyo sida dakhliyada ka soo xerooda horumarinta khayraadkaa loogu kala qoondayn doono maalgashadaha iyo dawladda. Saddexda ugu caansan heshiisyada batroolku waa:

(i) Canshuur iyo gunno;

(ii) Qaybtan waxsoosaar; iyo

(iii) Qandaraasyo adeeg,

in kasta oo labada nooc ee hore kaliya aad loo adeegsado. Faahfaahin kooban oo ku saabsan tognaanta iyo tabnaanta heshiisyadaa waa sida hoose:

3.3.1 Canshuur-iyo-Gunno

Heshiiska noocan ah qandataaslayaashu waxay siibaan dawladda gunnooyin ay ku bixiyaan qaab hadba waxa ay soo saaraan inta uu la'egyahay, sida badanaa dhacda boqolkiiba in dakhliga guud ka mid ah, iyo canshuuro laga qaado dakhliga qandaraaslaha u soo xerooda intiisa kale. Faa'iidada ugu mudan ee habkani leeyahay waa (i) waa hab guud ahaan duuduub u shaqeeya oo aan loo baahanayn in xaalad ba si gooni ah looga gorgortan, (i) waa hab sugaya dakhli hormaris la isku hallayn karo ah oo dawladda soo gala, iyo (iii) waa hab ay fududdahay maarayntiisu.

In kasta oo hay'ado sharciyeed ka la duwan ay ku lugleeyihiin, heshiisyada canshuur iyo gunno ee waaxda batroolka (sida kuwa, UK, Norway, Brazil), waxaa badanaa laga adeegsadaa waaxda khayraadka macdanaha, iyada oo loo eegayo khasaarooyinkeeda badan; kow, gunnooyinka laga qaado dakhliga guud waa kharash u sii dheer qandaraaslaha kan waxsoosaarka kaga baxa, taa oo keeni karta in qandaraasluhu aanu ka shaqayn meelaha qaarkkood oo waxsoosaar u diyaar ah, ama uu si degdeg ah uga joojiyo waxsoosaarka meel cayiman marka kharashka ku baxayaa badanyahay faa'iidaduna yartahay. Labaad, gunnooyinku ku ma xisaabsana kharashka guud, sidaa awgeed waa naaqus mar walba. Tani waxay keeni kartaa dhibaato siyaasadeed oo la xiriidha goobaha waxsoosaar ee faa'iidadoodu sarrayso, kuwaa oo qandaraaslaha loo arki arko in faa'iido badan ka helayo horumarinta waxsoosaarka. Arrintan waxay badanaa u baahataa dejinta "canshuur dheeraad ah oo faa'iidada laga qaado" si la isugu dayo in faa'iidada badan la soo duwo, taasina waxay qorhsaha guud ka dhigi kartaa mid sii murga. Dhab ahaan, UK, Norway iyo Barazil waxay habahkooda canshuur-gunno ku sii sidkaan nooc kale oo ah canshuur faa'iido.

Intaa waxaa dheer, gunnooyin culus waa niyadjebiyaan qandaraaslaha, sida dalal ka jirtan loo ma adeegsan canshuurceliska shirkad ajnabi. Tusaale ahaan, "Internal Revenue Code"ka dalka Maraykanka wuxuu oggolyahay in shirkadaha Maraykanku ay sheegtaan

in loo soo celiyo canshuuraha ay siiyaan dawadaha qalaad, se taa u ma oggola gunnooyinka ka bxa.

3.3.2 Qandaraasyada Adeegga

Habkani waa mid ay dawladdu qandaraaslayaasha siinays xig lagu heshiiyay oo lagadhiibayo adeegyadooda ama soosaaridda batroolka, guud ahaanna waxaa la adeegsadaa marka dawlad qaran ay si buuxda gacanteeda ugu jiraan xuquuqda batroolka iyo soosaaristiisuba. Xigta waxay noqon kartaa in lacag ah oo cayiman (sida, heshiis aanu qandaraasluhu wax xil ku lahayn wixii khasaare ka yimaada sahaminta), ama faa'iido cayiman oo maalgashiga laga siiyo (sida, heshiis khasare hawlgal daboolaya, markaa oo qandaraasluhu qayb xilka khasaaraha sahaminta ka iman kara). Marka qaarkood, gaar ahaan dalalka aanay khatar farsamo in ay ka timaaddaa ay aad u hooseyso, heshiisyada noocan ah waxay keeni karaan faa'iido badan oo dawladda u soo xeroota. Dhanka kale, khatarta mashruuc waxaa xikeedu hoorraan fuulaya dawladda (gaar ahaan marka qandaraasyada adeeg oo khalli ah la gelayo), qandaraasyadaa waxay kale oo la iman karaan gaabis xagga hawlgalka ah oo keeni kara in aan si fiican khayraadka loo wada saarin. Qandaraasyada adeeggu waxay kale ee aad u xaddiidaan faa'iidada maalgashadayaasha u soo xerron lahayd (mar kale, gaar ahaan qandaraasyda adeegga khalliga ah), sidaa darteedna soojiidasho ma leh meelaha tallanku ka jiro inta uu la'egyahay khayraadka ku jira dalka iyo wixii khatar degeleed la taabn karo ee carrigaa ka jirta.

3.3.3 Qaybtan Waxsoosaar

Hababka qaybisga waxsoosaar waxaa aad looga adeegsadaa waaxda khayraadka batroolka. Dalalka adeegsada PSCs oo badan waxaa ka mid ah; Algeria, Brazil, Cameroon, Chad, Colombia, Democratic Republic of Congo, Libya, Kurdistan [Ciraaq], Malaysia, Nigeria, Qatar iyo Trinidad & Tobago. Marka habkan heshiis la adeegsado qandaraaslayaashu (halkii dawladda, marka qandaraas adeeg la door bido) ayaa qaada mas'uuliyadda khatarta ka iman karta sahaminta khayraadka. Marka soosaariddu bilaabato, qandaraasluhu wuxuu la haraa boqolkiiba in ka mid ah dakhliga soo xerooda ilaa raasamaalkii ka baxay uu u soo laabto, faa'iidada soo hadhana waxaa qaybsada qandaraaslaha iyo dawladda.

Jaantus 3.1: Qulqulka Dakhli ee Habka PSC — Dulmar



Waxaa jira noocyo badan oo qaybtan waxsoosaar ah, se badankoodu waxay wadaagaan in ay yihiin kuwo horusocod ah. Qaybta dawladdu helayso waa ay kordhaysaa markii faa'iidadu korodho ba, sidaa awgeedna guud ahaan waxay soo jiidasho dheeraad ah u leedahay maalgashadayaasha oo ka door boda heshiisyada kale ee canshuur-iyo-gunno ama qandaraas-adeeg. Intaa waxaa dheer, haddii ay jirto in kharashka boqolkiiba in batroolka ka mid uu ka yaryahay 100%, habka waxsoosaar qaybtanku wuxuu leeyahay mid ka mid faa'iidooyinka habka gunnada oo ah lacag horumaris ah oo dawladda u soo xerooda marka waxsoosaarku bilowdaba. Dhab ahaan, habka kharash-batroolka ku xaddidan wuxuu ilaa xad u shaqeeyaa sidii hab gunno dawladda u xeroonaysa. Khasaarada ugu wayn ee uu leeyahay habka qaybtanka waxsoosaar in maraca qaarkood ay adagtahay maarayntiisu, in kasta oo PSCs qaarkood.

Jaantus 3.2: Qulqulka Dakhli ee Habka Qaybtanka Waxsoosaar (PSC) — Faahfaahin



3.4 Hababka Qaybtanka Waxsoosaar

Nooca ugu caansan heshiisyada batroolka, qaybtanka waxsoosaar, waxaa ku jira dhawr siyood oo lagu go'aansado sida dakhliyada soosaaridda batroolka ay u qaybsadaan dawladda iyo qandaraaslayaashu. Siyaabahaas waxaa ka mid ah heerka waxsoosaar ee maalmeed, ama ("**DROP**"), waxsoosaar urura, heerka faa'iido soo celineed ama ("**ROR**") iyo "**R-Factor**."

3.4.1 Heerka Waxsoosaarka Maalmeed

Habka DROP marka la adeegsanayo, qaybta faa'iiddada batrolka ee dawaldda waa korodhaa markii heerka waxsoosaarka maalmeed ee goobta qandaraasku korodhoba. Habkan toos xisaabta ugu ma daro sicirka suuqa ee batroolka iyo kharashka ku baxa waxsoosaarka goobta qandara midna, sidaa awgeed ayuu ka dhiganyahay hab hrotusocka xanniba. Dalalka waxay adeegsadaa noocyo kala duwan oo isla habkan ah si ay u go'aansadaan inta ay noqoqyaan qaybaha ay dawladda iyo qandaraasluhu kala helayaan, taa oo ku dhisan heerka waxsoosaar ee batroolka laga faa'iido kaliya ee aan ahayn waxsoosaarka oo idil. Hab faraceedkan laga adeegado Masay iyo Kenya si ayuu uga horusocodsanyahay habka DROPka caadiga ah eek u dhisan qaybtanka waxsoosaarka oo idil. Noocyo ka mid habka DROP waxaa kale oo laga adeegsadaa dalalka Tanzania, Uganda, Equatorial Guinea iyo Ethiopia.

Jaantus 3.3: Qaybtanka Waxsoosaarka Idil - Sharraxid



3.4.2 Dhitaynta Waxsoosaar

Hab kale waa kan loo yaqaan "dhitaysi waxsoosaar" ee qaybta dawladdu helayso uu kordho marka uu kordho iskucelceliska waxsoosaarka guud. Sida habka DROP, waxsoosaarka noocan ah waxaa la isku dayaa in uu u shaqeeyo sidii hummaag faa'iido, se xisaabtanka ku ma darsado sicirka badeecada ama kharaska waxsoosaarka.

Si ay ahaataba, waxaa jira laba ha boo kale oo si ka sii dhow faa'iidada u dabagala, sidaana ku yeesha ifafaale horusocodnimo.

3.4.3 Heerka Faa'iidada

Kan ugu horreeya habakaa waa kan ku dhisan ku qaybtanka heerka faa'iidada la helo, kaa oo dhab ahaan uun gunno canshuureed ah. Habkani wuxuu qiimeeyaa heerka ay le'egtahay faa'iidada qandaraaslaha soo gasha ee loo adeegsado qiimedhimis lacgaeed, qaybta dawladduna waa korodhaa marka heerka faa'iido ee qandaraasluhu ay korodhoba. Angola, Russia, Uzbekistan iyo Tanzania (oo ku doortay canshuurta faa'iidooyinka dheeraadka ah la saari) ayaa ka mid ah dalalka habkan wax ku qaybsiga heerka faa'iidada adeegsada.

Jaantus 3.4: Sharraxid Qaybtanka Heerka Faa'iido



3.4.4 R-Factor

Si la mid ah, habka lagu magacaabo "R-Factor" wuxuu ku gooyaa qaybta dawladda si ku salaysan farqiqa ay isu jiraan iskucelceliska dakhliyada iyo kharashyada baxa. Marka ay korodho faaäiidada goobta qandaraaska lagu qaatay korodhoba waxaa kordha qaybta dawladda u go'aysa.

Sidaa awgeed, habka heerka qaybtanka heerka faa'iido ama R-Factor midkood ayaa noqon kara mid aad horusocod u ah, haddii si habboon loo xusho. Horusocodnimada marka laga yimaado, hababkaa waxay meesha ka saaraan baahida in la dejiyo DROPyo kala duwan oo loo adeegsado khayraadka batrool iyo gaaska. Maadaama hababkaa lagu go'aamintooda lagu saleeyo soo xeroodka lacag caddaan togan ama taban (siiba RORka) ama dakhliyada iyo kharashyada (siiba R-Factor), isla hal hab uun ayaa isku mid loogu wada adeegsan karaa saliidda iyo gaaska. Intaa waxaa dheer, labadaa hab midkoodba wuxuu meesha ka saaraa in loo baahdo canshuuridda faa'iidada dheeraadka ah si wax looga qabsado faa'iido baahsan oo la filayo, sida hababka canshuur-iyo-gunno ee kor ku xusan.

Haddii la isu foodiyo hababka qaybtanka heerka faa'iido (ROR) iyo F-Factor, ROR ayaa wuxuu ku fiicanyahay in ku xisaabtamo qiimaha lacageed ee watiga waxsoosaarka la geshaa leeyahay, halka habka F-Factor uu fikrad ahaan ka fuduyahay uusanna u debecsanayn muddaynta soo xerooshadsa dakhliga lacageed ama arrimaha ay ka mid

yihiin “gold plating”ka[4] kharashka ku baxa waxsoosaarka. Labada xaal midba, u hogaansamidda xeerarka qandaraasku waa muhiim. R-Factor ma doono in heerka faa’iido si cad loogu qeexo qodobbda heshiiska, taa oo yaranaysan khatarta ka iman karta dhisidda xeerar aan u cuntamin maalgahsdayaasha ama cakiri kara gorgotannada shatiyo bixinta.

Jaantus 3.5: Sharraxid Qaybtanka R-Factor



[4] Habka qaybtanka heerka faa’iidada (ROR) wuxuu xisaabta ku darsadaa qiimaha lacageed ee waqtigu leeyahay, taa oo macnaheedu yahay in qiimaynta ROR ay u jajabantahay muddaynta iyo inta uu le’egyahay maalgashiga hore, marka loo eego waxsoosaarka hore. Muddaynta kharashka waxsoosaarka hore wax saamayn ah ku ma laha qiimaynta qaybtanka waxsoosaarka F-Factor.

4 DULMAR IYO GEBAGEBO

Sida lagu muujiyay falanqaynta kor ku xusan, waxaa qodobbo dhawr ah oo aan looga maarmin in si habboon loo dhiso qorshaha sharci iyo xeer ee lagu dhaqayo khayraadka batrool ee dal leeyahay iyo heshiisyada batroolka iyo qorshe miisaaniyaeed oo hirgeliya xeerarka maalgelineed. Mid walba oo yoolashaa ka mid ah waxa uu qaynb ka yahay qoddobada soojiidashada maalgelin batrool oo dibedda ka timaadda iyada oo isla markaa la sugayo in dalka waxsoosaarkiisa martida loo yahay uu faa'iidada ugu wayn ka helo khayraadkiisa dabiiciga ah.

Qorshe sharci iyo xeerar batrool oo si habboon loo qaabeeyay waxa uu ka koobanyahay dawr qodob oo muhiim ah. Kowaad, dastuur qeexaya arrimaha muhiimka ah ee ay ka mid yihiin qoondaynta dakhliyada iyo lahaanshiyaha khayraadka abtrool, kuwaa oo lagamamaarmaan u ah hab dawladeedyada federaalka ah. Heshiis laga gaaro qodobbadaa saldhigga ah iyo in dastuurka si kama dambays loogu qoro waxa gacan ka geysaynaysaa in meel Isfahan dhexe ah ay isugu yimaadaan inta dani ugu jirto waxayna yaraynaysaa khilaafyo yimaada oo dhex mara maalgashadayaasha qalaad iyo dawladda, iyo isla dalka dhexdiisa..

Labaad, sharciyada iyo xeerarka batroolku waxay u adeegaan in ay (i) si guud u dhugaan xeerarka ka qatbqaadashada waxsoosaarka waaxda, iyo in laga helo (ii) siyaabo sahlan oo lagu buuxin karo faahfaahinaha loo baahanyahay oo badankoodu ka dhasha lajaanqaadka waayaha.

Ugu dambayn, heshiisyada batroolka ee la yaqaan waxay dhigeen hab dhexe oo qandaarsyada oo dhan lagu fulin karo, taa oo fududaynaysa culayska maarayneed ee hay'adaha xilku ka saaranyahay hubinta u hogaansanka qandaraaseed, taa oo markeeda gacan ka geysanaysa in dalka iyo dadwaynihiisuba ay helaan faa'iido ka dhalata qandraasyada khayraadkooda ee ay xaqa u leeyihiin.

Haddii la soo kobo, sharciyada iyo xeeraraka batrool ee meelmarka noqdaa waxaa lagu la oran karaa waa in qodobbo yar ah oo dastuurka ku qeexan, se ah dhigaya sharci batrool oo ballaaran loodamina kara oo xeerarkiisa xoojinaya leh iyo heshiis batrool oo dejinaya qodobbo meel dhexe la isugu keeno oo lagu dhaqo qandaraaslayda waaxda batroolka, kuwaa isku duub ahaan maalgashadayaasha u caddeeda qaabka maalgashi iyo dhammaan arrimaha muhiimka u ah ka qaybqaadashada waaxda batroolka.

Marka laga eego in qandaraaslayaal loo adeegsado horumarinta khayraadka batroolka, dejinta qorshe miisaaniyadeed oo habboon waa u muhiim in la helo isu miisaamid u dhexeyasa soo jiidashada maalgalineed ion in heshiiska ugu faa'iido badan dalka khayraadka leh loo saxiixo. Doorashada heshiis batrool kan ugu habboon, iyada loo eegayo dalka khayraadka leh xaalladda gaar ahaaneed ee uu ku suganyahay, waa arrinta ugu mudan hirgelinta qorshaha miisaaniyadeed ee dal. Qandraasyada waxsoosaar qaybtanka ku dhisan waa heshiiska batrool kan ugu caansan, gaar ahaan dalalka waaxdooda dhaqaale ee khayraadka batroolku soo korayso, qandaraasyadaa oo lagu door bido in ay waxsoosaar qaybsi horusocod ah ion maarayntooda oo fudud isku darsadeen. Isla qandaraasyada qaybtanka waxsoosaar waxaa ka mid ah siyaabo

badan oo wax loo qaybsado, iyada oo hababka qaybtanka heerka faa'iido (ROR) iyo R-Factor ay yihiim kuwa ugu horusocdsan ee jira.

LIFAAQ **A**

Eraygaabin iyo Eraybixin

4 Erayda soo socda waxay leeyihiin micnayaasha hoos ku qoran, marka warbixintan loo adeegsanayo.

5 "**DROP**" **(**Daily rate of Production) = Heerka Waxsoosaarka Maalmeed

6 "**EITI**" Extractive Industries Transparency Initiative.

7 "**FGS**" (Federal Government of Somalia) = Dawladda Federaalka ah ee Soomaaliya.

8 "**INP**" (National Petroleum Institute) = Machadka Batroolka Qaranka

9 "**ORSA**" = (Oil Revenue Stabilization Account) = Sanduuqa Xasilinta Dakhliga Batroolka.

10 "**LNG**" (liquefied natural gas) = Gaas Dabiici Dareere ah

11 "**PPP**" (Public-private partnership) = wadalahaansho Guud-iyo-Gaar

12 "**PSC**" (Production Sharing Contract) = Qandaraas Qaybtan Waxsoosaar

13 "**R-Factor**" macnaheeda waxaa lagu sheegay qaybta **Error! Reference source not found.**.

14 "**ROR**" (Rate of Return) = Qaybtanka Heerka Faa'iido

15 "**SWF**" = Sovereign Wealth fund

Ku Saabsan Lataliyeyaasha

Hunton & Williams waa shirkad si buuxda u shaqaysa oo takhasuskeedy yahay Sharciyada Caalamaiga ah, ayna ka shaqeeyaan ilaa 800 oo sharciyaqaanno ah. Shirkadda 19-keeda xafiis ee ay ku kala leedahay Maraykanka, Yurub iyo Aasiya waxay u adeegaan mcaamiil adduunka ku firiqsan. Waxaa macaamiisayada ugu adeegsanaa aqoon ballaadhan oo aannu leennahay waxsoosaarrada kala duwan ee adduunka ion khibrad koobaysa ku dhawaad laan walba walba oo sharciyada dunida ka mid ah. Waagii la aasaasay shirkadda Hunton & Williams, waxay caddaysay in yoolka aan higsanayanaa yahay in aannu macaamiisha ugu adeegno sidii shikad sharciyaqaan oo si buuxda u hawlgasha oo la tartamaysa shirakadaha ugu wanwanaagsan dalka. Waagaa ilaa hadda, hankayaga shaqo aad ayuu u balaadhay, waxaa se wali naga go'an ballantayadii ahayd in aannu macaamiisha u qabanno hawl sharci tan ugu wanaagsan oo si ballaadhan u koobaysa dhammaan laamaha sharciyeed ee kala duwan iyo waxsoosaarrada kala duwan. Sharciyaqaankaa qareennada ah ee tiradoodu ilaa 800 gaarayso,19 ka xafiis ee Hunton & Williams dunida ugu kala yaal waxaa jooga 150 si joogto ah ugu heellan in ya kala taliyaan macaamiisha arrimo badan oo la xiriira waxsoosaarrada tamarta ion dhismaha kaabayaasha dhaqaale ee waawayn, kuwaa oo ay ka mid yihiin saadka iyo dhismaha, qorshaynta mashruucyada, injineerinta, maalgelinta qandaraasyada, xeerinta iyo ilaalinta deegaanka, kala wareegsiga shirkadaha iyo dibuqaabaynta dhaqaale.

Sharciyaqaannada Hunton & Williams u shaqeeya waxay ay heleen darajada ugu sarraysa *The Chambers Global Guide* qaaradda Afrika ka la taliyeen Sharciga Mashruuctada iyo Tamarta iyo Sharciga Ganacsiga Guud (Projects & Energy Law and General Business Law, iyo billado kale. Sharciyaqaannada ku takhasusay Tamarta Adduunka ion Dhismaha Kaabayaasha Dhaqaale (Global Energy and Infrastructure) oo hababka sherciyeed ee Maraykanka ion Ingiriiska labadaba ku shaweeya, waxay xoogga saaraan arrimaha qaybahaa la xiriira, iyaga oo adeegsanaya ilaha adeeg ee shirkadduu dunida daafaheeda ku leedahay. Macaamiisha waxaa ka mid ah maalgeliyeyaal iyo sanduuqyada wadaagga kayd ee goodida loo leeyahay, shirakadaha tamarta ee aan la xeerin, kuwa la xeeriyo ee ka shaqeeya gaaska iyo korontada, dhuxusha iyo shirkadaha gaadiidka, hay'adaha isgaarsiinta goboleed, sytem operators-ka madaxa bannaan, suuqgeeyeyaasha tamarta, shirkadaha sii qaybinta korontada ee madaxa bannaan, ion sidaa oo kale dawlado federaal, gobol, degaan oo qaarab walba ku yaal.

Mashruuctada shirkaddu ka shaqayso waxay isugu jiraan laga bilaabo warshadaha korontada dhaliya ee dhuxusha ion gaaska ku shaqeeya, kaydinta gaaska iyo Rugaha LNG, dhuumaha caadiga ah ee saliidda ion gaaska qaada ion jidadka ay sii maraan, iyo warshadaha waawayn ee biyaha sifeeya oo kala miira, ilaa rugaha yaryar ee tamarta dib loo curin karo ka shaqeeya, iyaga oo adeegsanaya shidaallo kala duwan oo aan ahayn kuwa caadiga ah.

Copyright © 2015
The International Bank for Reconstruction and Development/The World Bank
1818 H Street, NW
Washington, DC 20433
Telephone: 202-473-1000
Internet: www.worldbank.org

Warqadaqooneedyada Bangiga Adduunka (World Bank) waxaa loo daabacaa in sida ugu dhakhsaha badan loogu gudbiyo waxa ka soo baxa shaqada Bangigu u hayo hay'adaha horumarinta ku hawllan. Sidaa awgeed, qoraalka warqadaqooneeddan loo ma diyaarin hab waafaqsan qaab ku habboon kuwa sida muuga leh loo tifatiro. Ilaha xigasho ee warqaddan lagu xusay qaarkood waxaa dhici karta in aanay ahayn kuwo si qumman u soo baxay ama aan si fudud loo heli karin. Warqaddan waxaa soo saaray shaqaalaha ama lataliyeyaasha Bangiga Caalamiga ah ee Dibudhiska iyo Horumarinta / Bangiga Adduunka. Waxayaalaha lagu soo saaray, sharraxaadaha ku qoran, iyo qeexidaha warqaddan ku qoran ma aha in ay ka tarjumayaan aragtiyaha Maareeyeyaasha Guud ee Bangiga Adduunka ama dawladaha ay matalaan. Dhammaantood waxaa iska leh qorayaasha, waana in aan sina loogu qaadan kuwo ka soo fulay Bangiga Adduunka, ama hay'adaha la jaalka ah, ama xubanaha guddiigooda maaraynta iyo dalalka ay matalaan. Bangiga Adduunku ma dammaanadqaadayo dhab ahaanta wacaalka halkan ku qoran, wax xil ahna ka qaadi mayo wixii ka yimaada iyo sida loo adeegsado, sida ay doonaan ha ahaadaan e. Xudduudaha, midabbada, cabbirrada, ama wacaalka kale ee ka muuqda khariidad walba oo halkan ku taal ka ma dhigna fikrad Kooxda Bangiga Adduunku ka qabaan sharcinimo aqoonsi ama daleed ama aqoonsi xudduudahaa midna.

Xuquuqda Hantimaanka iyo Fasaxaqaadashada

Wacaalka ku qoran warqaddan xuquuqdiisa hantimaanku waa dhawrantahay. Dheegasho iyo / ama sii gudbin qaybo ka mid ama dhammaan qoraalkan iyada oo aan fasax loo helin waxay noqon kartaa ku xadgudub sharci jira oo la isku qaadi karo. Bandgiga Caalimiga ah ee Dibudhiska iyo Horumarinta / Bangiga Adduunka wuxuu dhiirrigelinayaa baahinta qoraalladiisa aqooneed, sida caadada ahna fasax dhakhso leh ayuu ku bixiyaa in dib loo daabacdo qaybo ka mid ah.

Wardoonnada ku saabsan xuquuqda qoraalkan iyo shatiyada oggolaansho baahin, oo ay ku jiraan kuwa sii baahintu, waa in lagu soo hagaajiyaa cinwaankan:
Office of the Publisher, The World Bank, 1818 H Street NW, Washington, DC 20433, USA; fax: 202-522-2422; e-mail: pubrights@worldbank.org.